

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka  
Xafiiska Guddoomiyaha



الجمهورية الفيدرالية الصومالية  
مجلس الشعب  
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic  
The House of the People  
Office of the Speaker

Ref: .192../12/01/B-10/18 الرقم:

Mogadishu Dec 20 2018: التاريخ

Ku: - Dhamaan Xildhibaanadda Golaha Shacabka  
L/H Golaha Shacabka

Og: - Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka  
L/H Golaha Shacabka

**Ujeedo:- HINDISAHA XIL-KA QAADISTA MADAXWEYNAHA JFS (09/12/2018)**

KA DIB MARKII AAN ARAGNAY: Soojeedinta Tuhummada Gaboodfallada lagu soo eedeeyey (impeachment) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay soo jeediyeen 92 xildhibaan oo ka tirsan Golaha Shacabka, ee 9-kii Desembar 2018 soo gaaray Xafiiska Guddoonka Golaha Shacabka;

KA DIB MARKII AAN QADARINAY: Cabashada naga soo gaartay 14 xildhibaan oo ka mid-ahaa Soo jeediyeyasha ku saxiixan mooshinka tuhummada Gaboodfalka kor ku xusan oo ka dacwoonaya in aysan saxiixin kana mid ahayn mooshinka.

MARKAAN ARAGNAY: In weli aysan dhisnayn Maxkamadda Dastuurka Fedraalka ee ku xusan Qodobka 109 B (1), ee loo gudbin lahaa Soojeedinta Tuhummada lagu soo eedeeyey Madaxweynaha JFS si waafaqsan Qodobka 92 (2) ee Dastuurka si ay u xaqiijiso in eedeymuhu leeyihiin sal sharciyeed, awood dastuuri ahna u leh dhageysiga iyo go'aan ka gaarista dambiyada lagu soo oogo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo keeni kara xil ka qaadista Madaxweynaha si waafaqsan Qodobka 109 C (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya;

MARKAAN ARAGNAY: In Maxkamadda Sare ee hadda jirta aysan isu beddeli karin Maxkamad Dastuuri iyo/ama isu rogto Maxdamadda Sare ee Cadaaladda oo awood u leh Maxkamadaynta dambiyada

Golaha Shacabka kusoo eedeeyo Madaxweynaha  
Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan  
Qodobka 6-aad ee Sharciga Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee  
12/6/1962, iyo lifaaqa 1-aad ee isla sharcigan Qodobbadiisa  
1-aad; 2-aad; 7-aad iyo 8-aad;

MARKII AAN SI QOTTA DHEER U DARISNAY: Nuxurka qodobbada ee deymaha tuhummada  
ah ee ku xusan soojeedinta ku taariikhsan 9kii Desember  
2018, aragnayna in aan laga gungaari karin ayadoo tubta  
sharcigu tilmaamay iyo hay'adaha Garsoorka kor ku tilmaan  
la'aantood;

HADDABA, GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA: waxaa la habboonaaday in uu wadahal  
gudaha ah la galo xildhibaanada soo gudbiyay Soojeedinta (Mooshinka) ka dhan ah  
Madaxweynaha JFS.

Kulamo wada xaajood dhowr ah oo si gaar ah Guddoonku ula yeeshay xildhibaanadan soo  
jeediyey Mooshinka, ayaa iyagoo tixgelinaya xaaladaha uu dalku ku sugan yahay iyo in loo  
baahan yahay in la abuurdo lana xoojiyo jirista xasillooni siyaasadeed si hawlaha culus ee laga  
doonayo Golaha Shacabka iyo Golaha fulinta si wadajir u fuliyaan, waxay xildhibaanadan soo  
jeediyeen in ay gebi ahaanba ka tanaasuleen hindisahooda xilka qaadista Madaxweynaha JFS ee  
ku taariikhaysnayd 9-kii Diseembar 2018.



Guddoonka Golaha Shacabka wuxuu mahad ballaaran u jeedinayaa dhammaan xildhibaanada  
Golaha Shacabka sida wacan ee barlamaaniga ah kuna dhisan dhaqanka dimuquraadiyadeed oo ay  
ugala shaqeyeen Guddoonka Golaha Shacabka xallinta arrinkan ugana tanaasuleen xaqooda  
dastuuriga ah iyagoo u turaya una hiilinaya xaaladaha dalka.

Sidaas daraadeed, Guddoonka Golaha Shacabka wuxuu caddeynayaa in soojeedintii Tuhummada  
Gaboodfalka ku taariikhsnayd 9-kii Desember 2018 uu halkaas ku burey maanta oo ay taariikhdu  
tahay 20 December 2018.

Ugu dambayntii, Guddiga Garsoorka Arrimaha Diinta iyo Awqaafta ee Golaha Shacabka waxaa la  
Farayaa in uu si degdeg ah ula hawlgalo Wasaaradda Cadaaladda si loo hirgeliyo sharciga lr.23 ee  
ku saabsan dhismaha Maxkamadda Dastuurka ee ku xusan Qodobka 109 B ee Dastuurka  
Federaalka Soomaaliya

Naga Guddoma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan

M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdiraxmaan  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472

E-mail. [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so) [mmursal44@hotmail.com](mailto:mmursal44@hotmail.com)